

Gabayga: CAALLE DOOR Curiye: abwaan Maxamad Xuseen Faarax



Gabayga: CAALLE DOOR Indhoweydba caynleyda gabay, waanigaan curineCarrabkeeyga waataan ka jaray, casharradeediiyeHa yeshee, cunaha lay ma qaban, mana codeynweyneCaadiyaal intay tahay arrini, baan cuddo xiraayeMarkay talo cuyuban aasantana, waan cakabiyaayeAan cilaayo, caawoo kaleey, cuudin leedahaye. Casabadii Bariirriyo dadkii, gaal cadduhu laayeyMarrastiyo carruurtii kufrigu, uu cayaar dilayeyAnigoon casaarteeda maqal, carana buuxdhaafsanSow ciqaab ka daran maysan iman, oo dunuub culusaCabdikariin sidii loo cuqubay, caalam wada yaabyeAniguna Bashiir Cali Barroow, waan calool go'ayeGoortaan xasuus ku cabbiree, dhabu ciyoon eegoQalbigeeey canaanyooda iyo, laab carjaabada eCiishoodayeey talaxumaan, cudur ka weyneeyneCatibada kuwuu baday ayaa, siiyey cadaw baaseNinkuu rabey inuu ciiska daro, oo cajarra gooyoCanyayuubid loo sii sidii, maro cabbuur qaydeCawaaqibka dambeetiyo berrina, waa ka daran ceebeCanaadkaasna waxa noogu wacan, balaan caqiideeyo. Callaal qaran ah, caynaan calaqa, caaragoys madax ahDastuur cudur ah, xeer ka la carara, sheeko cagajiid ahCuraar hadaf ah, ceescees cindiya, aragti cuuryaan ahCaqli calaw ah, ra'yi cawara iyo, garasho caadraac ahCucub tala ah, celmuqayb rajaa, xaajo candadowl ahCod cinniin ah, cagadhabad canjila, ii dheh calwasaadaCurraaf camal ah, ciganfaag casriya, damac cayuumaadaCawcaw lumin ah, caaltaag carcara, ballamo ceeriin ahCosob dulun ah, cowriir cabbana, curasho ceegaag ahRun cajuus ah, been carro martiyo, hubanti caalwaa ahCaabuq barara, cillad soo baxda ah, ciriq siyaadaysaCuqdi koraya, cusri faafayiyo, ciifo cawo guur ahCarun da'ya, dhiig caadda mara, mayd is cirifyaal ahCabaad baxaya, caarcaar cuskuga, cabasho suurjiid ahCiso maqan ah, ceebaal cindaga, sharaf camaajiiir ahCadli garabla', cunsur ciidanliyo, daacad carcaraaf ahCudud qaybsan, caa'ilo colcolan, caydan ka la ciirsanCarrab sami hadlaayiyo calool, uurcadho camiiimtayWaa waxa dalkeennii cimbiyey, caaradka ahaayeHalka aay ka cudurdaarantahay, aan celmiyan baaro. Ca'da hore, caashuun ku adinkiyo, ii codeey anigaCaleensaarka dabadii cuftiyo, boqol culays sheeggaCasar ballanka, cishihii ka baxa, soo indho caddeyntaIs cajabinta, ceeryaan gunnimo, caado dhaqameyntaWanaag carinta, xumaan ceelalyada, ciddiyo hoos eeggaCabbur gelinta, calaqaad jarkiyo, dood cargaagtamiddaCurjintiyo, cadaad qodax mudkiyo, weerarro carraawgaWaxaan caad ku daahnayn cubcubid, calallo saarsaarkaMidaan circir ka imanayn misana, iga cabbardhowrkaCagaag dhigidda, camarloolankaa, caan ku noqotaankaCarar orodka, shisheeye u cidiyo, caabbud wejiyeeyntaCarra'edeg waxaan weli ka dhicin, soo camiritaankaCabsigelinta, hadba cagajuglaha, amarro cawlcawlkaCabbeey li'ida, kibir caallulkiyo, coofle bahaleeyntaCadgoosiga, careey iyo careey, caabbin ka horgeeyntaCiq ku siinta, cadkaanow ku cunay, ama ka ciideeydaCoobil carsilka, caalle doorashada, caaqil xulanwaagaCibro li'i, cataaw shacab ku jirid, hebel cambaareyntaCakudiyo, cabcabad gocashadiyo, eersi camantuurkaKontonkaas caqabad oo beloo, nolol cardaadiiq ahInta lagu caweeynayo Galayr, ama la cuulcuuliWaa calaacaal timaleey inaan, nabad ku cayshnaayeWaxaan uga caloolgo'ayna waan, kuugu soo celineKii haddeer la cayrshiyo midkii, loo dib carabbaaboWaysla caananuug aan midkood, caaqibo lahayneWaana wada dantood cuurtayaal, caadaqaata aheHalkacsigu qofkuu u cusubiyahay, haw cideyn weliyeKolleey anigu caarriga dad cuna, beel u ma cideyssto. Afartaa intaan ka la cayimay, dhaay ma ka caddeeyeyMa cabbiray xaqiiqadu halkeey, ka cillan ooyeeysoAf culaanka, iyo canug yarbaa, kaa calaanjiyayeMa cuskiyey anoon bayd camcamin, kii Cabdulle RaageAbwaanakii Carrooliyo sidii, Faarax ma ku caynsheyDhoodaan halkuu u cirbinjirey, cagaha mow saarayCulantii Suldaan Timacaddoo, kale ma caalcaalsheyCabdi Nuur sidiisii haddana, ceeb ma ka ilaalsheyAfar kalena waa cubtan xujee, balaan calaameeyo. Caato buuran, caddiin weyda iyo, wabax caboo oommanCayr tujaar ah, sabool coodde iyo, calaf cunniin waay ahDhereg ceeb ah, cagsi iyo layaab, baahi nolol cowryanCasuum dhagar ah, caawimid cimbina, hiil cadibitaan ahCaay ammaan ah, cisayn liida iyo, caaqibo xumaan ahCiqaab faraxle, guul carodhashiyo, caymis cirib gooyin ahColaad nabad ah, cildo wehelle iyo, jaar cabsi wadaag ahCashiiir nacab ah, marti cadawa iyo, tuugo ciidamis ahCaddi gudcur ah, cawo duhura iyo, subaxyo fiid cawl ahCaamo sheekh ah, aqoonyahan celmila, caalim jaahiliyaSodonkaas calaamoo cajaba, care bal yaa sheega?. Dhammaad.17/09/2017 **Curiye: abwaan Maxamad Xuseen Faarax**